

W A R G E Y S K A

# F S A N

15 APRIL 2018

Ma doonaysaa in aad afkaaga hooyo lagugu baro Theorie-ga iyo wadista baabuurka la xiriir

**AROS** **AUTORIJ SCHOOL**  
06-84 49 70 54



SOO SAARE: MOHAMED ABDI

TIFAFTIR: ZAHRA NALEIE

ALI WARE

**KULANKII**  
**XUBNAHA FSAN**  
DOODII QODOBKA ANBI

**6 FEB, 2018**  
**ISKU XIRNAANTA**  
LA DAGAALANKA GUDNIINKA

**MAAMUUSKA**  
**8DA MAARSO**

**WARARKA FSAN**  
JANUARY-MARCH 2018

**DOORASHADA**  
DOWLADAHAA HOOSE  
UGBAAD IYO EMMAN

**KAALO NEDERLAND**  
HORUMARINTA  
BULSHADA



”

*Inkastoo la i  
aflagaadeen  
jiray haddana  
waxaan ta-  
ageero ka he-  
lay dad badan*

**UGBAAD KILINCCI**  
Xubin ka tirsan xisbiga PvdA

# Ugbaad iyo Emmen

**Ugbaad Kilincci waxay ku guuleysatay inay ka mid noqoto maamulka dowlada hoose ee Emmen**

**Ugbaad Kilincci oo ah gabadh asal ahaan ka soo jeeda Somalia ayaa 21-kii bishan Maarso ku guuleysatay inay ka mid noqoto guddiga maamulka dowlada hoose ee magaalada Emmen ee goblka Drenthe ee koonfur-bari Nederland.**

Kilincci oo ka tirsan xisbiga PvdA ayaa heshay codadka 1007, iyadoo xisbiga uu helay 7173 doorashadii dowlaha hoose ee ka dhacday Emmen.

Ugbaad Kilincci, oo u sharaxneyd

maamulka hoose ee Emmen ayaa intii ku guda jirtay ololaha doorashada waxay marar badan hadalo cunsurinimo ah kala kulantay dadka deegaanka.

Waxay ku jirtay xubnahii PvdA ee u sharaxnaa maamulka dowlada hoose, iyadoo ku jirtay liiska 12-naad.

Ugbaad ayaa dalka Nederland timid iyadoo caruura, waxay waqti badan ku nooleyd magaalada Emmen.

Gabadhan oo xiran xijaabkeeda ayaa waxay ololaheeda dhexga-

shay dadka deegaanka inkastoo ay cunsuriyad kala kulantay, haddana waxay ka dhaadhicisay inay codad ka hesho.

Jaaliyadda Soomaalida Holland ayaa si weyn u soo dhoweeyey doorashada Ugbaad oo gashay dowlada hoose ee Emmen



# Ururada FSAN oo ka doodday qodobka ANBI

*Xubnaha waxay kaloo ka shireen sii loo xoojin lahaa xiriirka wada-shaqeeneyd ee ka dhexeeya ururada ka shaqeyta arrimaha bulshada*



*xubnaha iyo maamulka FSAN oo ka shiraya wax ka badelida qodob ka mida destuurka dallada*

**Guddiga guud ee maamulka dallada ururada Soomalida Netherlands (FSAN) ayaa 17-kii bishii Maarso 2018 kulan wada-tashi ah isugu yeeray ururada xubnaha ka ah, kaasoo ku saabsan wax ka badelida qodob ka mida destuurka dallada.**

Qodobkan ayaa ku saabsanaa sidii dalladu aqoonsi uga heli laheyd hay'ada waaxda canshuuraha wadanka Holland, si loogu aqoonsado urur ku mashquulsan ka shaqeynta arrimaha bulshada iyo gargaarka (ANBI).

Xubnaha dallada waxay isku raaceen wax ka badelida qodobkaasi.

Waxaa kaloo la iska wareystay xaaladaha Soomaalida ee Holland maadaama ururadu ka kala yimaadeen magaalooyin kala duwan.

Gegagabadii shirka waxaa lagu balamay sidii ururada Soomaalida ay si Hufan ugu caawin lahaayeen dadka Soomaalida ee degan magaalooyinkooda, lana xoojiyo iska war-qabka, isku duubnaanta Soomaalida dhexdeeda ah iyo wada shaqeyn wanaagsan oo dhex marta Soomaalida iyo hay'adaha ka jira magaalooyinkooda.

Waxaa kaloo la xusay sida ay u muhiim u tahay ka qeyb qaadashada arrimaha samafalka ee wadankii Soomaaliya. (Sida abaaraha, musii-booyinka kale iyo Dib u dhiska)



ALI WARE | Gud. FSAN

*Lahaanshaha qodobka ANBI waaxa uu saamaxayaa in qofkii lacag ku deeqo uu dib u weydiisan karo waaxda canshuuraha Netherlands.*



# Xuskii 6da Febaraayo ee sanadkan

• Halku-dhiga sanadkan waxa uu ahaa isku xirka dadka u ololeeye ka hortaga gudniinka



## 6-da Febraury sanad walba waxay ku beegan tahay xuska maalinta caalamiga ee la dagaalanka gudniinka gabdhaha.

Haddaba 6dii Febraury ee sanadkan ayaa waxaa munaasibadan lagu qabtay magaalada Rosmalen ee dalka Nederland, waxaana mowduuca sanadkan uu ahaa dhinaca sharciyada.

Waxaa lagu soo qaatay sharciyada gudniinka gabdhaha ee ka jira Afrika, Yurub iyo Holland.

Waxaa kaloo dood laga yeeshay in weli ay liidato dhinaca soo werjelinta kiisaska dhaca ee ku saabsan gudniinka gabdhaha dhamaan Yurub.

Kulankan waxaa soo wada qaban qaabiyey Platform 6/2 oo kala ah FSN, Pharos, Plan Nederland, Amref (Flying Doctors) iyo Defence for Children.

Gebagebadii kulankan, waxaa la isku raacay in la sii wado wacyi gelinta bulshada iyo tababarada la xiriira arrimahan iyo in xooga la saaro sidii dacwo loogu soo oogi dadka lagu helo arrimaha gudniinka gabdhaha.



**ZAHRA NALEIE**  
Barnaamijyada FSN



*Mowduuca sanadkan 2018 wuxuu ku saleysnaa sharciyada ka yaalla gudniinka gabdhaha sidii loo sii adkeyn lahaa fulintooda.*

# IFTIN & xafada maalinta haweenka aduunka

## ► Dumarka waa laf-dhabarka bulsho kasta ►

Ururka haweenka Soomaaliyeed ee magaalada Amsterdam iyo nawaaxigeeda ee **IFTIN** 31-kii bishii Maarso qabtay xafad lagu maamuusayey maalinta haweenka aduunka ee oo aheyd 8-dii Maarso.

Xafad oo ay ka soo qeyb galeen qaar ka mida haweenka qurbo-joogta Soomaalida ayaa waxaa looga hadlay wax-qabadka iyo kartida dumarka Soomaaliyeed ay ku maareeyeen noloshu qoysaskooda iyadoo ay jiraan daruufo adag oo ka yimid dhaqamada kala duwan ee ay kala kulmeen qurbaha.



Waxaa halkaas qadbado dhiiri galin ah ka soo jeediyay gabdhaha tusaalaha u ah wadanka Holland, si eey ula qeybsadaan khibradooda iyo waaya aragnimadooda gabdhaha kale.

Fadumo Abdikarim, madaxa guddiga maamulka IFTIN oo horeyn furtay munaasibadan ayaa si weyn u soo dhowaysay hablahii ka soo qeyb galay shirkan, aadna u bogaadisay dadaalka ay dumarka ugu jiraan tiigsashada horumarka noloshu qoysaskooda.

Shukri Sheik Hassan, madaxda ururka IFTIN ayaa ugu horeyn ka hadashay waxqabadka ururka, gaar ahaan mashaariicda wacyi-gelinta ay wadaan sida barbaarinta iyo badbaadinta caruurta iyo sidoo kale sidii Soomaalida loogu caawin lahaa arrimaha ka qeyb qaadashada noloshu Holland.

Dr. Suad Abdirahman ayaa iyaduna halkaasi ku dhiiragelisay dumarka inay yeeshaan kalsooni iyo wax wada qabsi, iyadoo sidoo kale ka qeyb galayaasaha siisay casharo ku saabsan cilmi-nafsiga.

Agaasimaha ururka **HIRDA** Fadumo Farah ayaa ka mida aheyd madaxdii halkaasi khubada ka jeediyey, iyadoo u sheegtay in barashada luqada ay muhiimad u leedahay noloshu ubadkooda, waxayna xustay inay jirto fursad waxbarasho oo ay ka heli karaan dalkan haddii ay dadaalaan.

Waxaa goobtaasi ka hadashay Raho Gesey oo ka mida howl-wadeenada IFTIN. Raho waxay hadalo isugu jira amaan iyo dhiiragelin u jeedisay dumarka Soomaaliyeed, iyadoo kula dardaarantay inay iskaashaadaan oo ay isgarab taagaan.

Ugu dambeyn Waxaa halkaasi shahaado sharaf lagu lagu gudoonsiiyey 6 gabdhood ku iska-wax qabso kula shaqeeya **IFTIN**.

Sidoo kale waxaa iyagana halkaasi shahaadooyin lagu gudoonsiiyey gabadha ku darsahada ku mudan dadaalkooda.



**DR. S. ABDIRAHMAN**  
Psychiatrist

“

*Qofka dumarka waxaa muhiim ah inay kalsooni isku qabto oo ay ogaato kartida qof ahaaneed ee ku jirta oo ay og tahay inay horumar gaari karto.*

...



**SHUKRI H. SAID**  
Agaasimaha IFTIN

”

*Iftin waxay mar walba u taagan tahay sidii xirfad iyo aqoon u siin laheyd dumarka, lakin dumarka iyagaa la doonayaa inay la yimaadaan rabitaan iyo go'aan,*

...

# Kaalo Nederland & horumarinta bulshada

Ururka Kaalo Nederlands oo xubin ka ah dallada FSAN ayaa magaalada Garowe xariga ka jaray dhismaha xarunta dhexe iyo dhalinyarada (City Center and Youth), kasoo qeybo ka mida loogu talagalay in dhalinyarada Soomaaliyeed ay wax ku bartaan, kuna qabsadaan shirarka iyo doodaha wax-galka ah.

Abdisalan Ali, isku-duwaha mashaariicda Kaalo Nederland ayaa sheegay in dhismahan uu ka kooban 2 dabaq oo kala ah, dabaqa 1aad oo ka kooban hoolka shirarka, maktabad iyo 4 suuli. Dabaqa 2aad oo ka kooban 6 xafiis oo dhameystiran qalab-kooda.

Hoolka shirarka ayaa waxaa loogu talagalay in dhalinyarada ay ku kulmaan, ayna ku qabsadaan shirarka iyo doodaha si bilaash ah, iyadoo maktabadana ay yaalaan buuggaag cilmi iyo 31 computer.

Abdisalan waxa kale oo uu sheegay in xafiisyada loogu talagalay in ururada yar yar ee gudaha Soomaaliya ka jira ay ku shaqeystaan.

*“Wixii ka baxsan dhalinyarada ee adeegsanaya dhismahan waxaa laga qaadayaa qarash aan badneyn oo aan ugu talagalay inaan ku bixino biilasha iyo mushaar-ka shaqaalaha ka howl galaya xaruntan”*

Sida uu sheegay Abdisalan, maalgelin dhan \$215,000 ayaa ku baxay dhismaha xaruntan, kuwaasoo kala bar ay bixisay hay'ada Kaalo, inta kalena ay laga soo aruuriyey hay'ado caalamiya iyo ganacsato Soomaaliyeed.

*“Xaruntan waxaa ugu talagalnay inay daboosho baahida dhalinyarada Garoowe ay qabaan meel*



*Dhismaha xarunta Kaalo Nederland ay ka hirgelisay Garowe, Puntland*

*ay iyagu leeyihiin oo ay ku kobcyaan aqoontooda, ayna kaga arrinsadaan horumarkooda mustaqbalka” ayuu yiri Abdisalan.*



*“Hadafka hirgelinta xaruntan cusub waxa weeye inaanu ka qeyb qaadano horumarka bulsho ee Somalia*

Waxa uu intaa ku daray in Khamiis kasta hoolka shirarka lagu qab-

to doodo ay dhalinyarada isugu timaado oo hadba lagu casuumo aqoonyahan ay garanayaan oo u faa'iideeya.

Waa xaruntii ugu horeysay ee Garoowe laga hirgeliyo oo ay dhalinyarada si bilaash ah ugu kulmaan oo ay arrimahooda kaga tashadaan.

Abdisalan waxa uu sheegay in hadda ay qorsheenayaan in ay Garoowe laga hirgeliyo xarun idaacadeed oo dhalinyaradu ay ku baahin karaan fikradahooda.

Kaalo Nederland waxa kale oo ay gobolada Puntland ka hirgelisay mashaariicda kaluumeysiga iyo abuurista fursado shaqo oo ay u sameysay qoysas badan oo danyara iyo sidoo kale horumarinta reer miyiga oo loo abuurayo fursado shaqo oo ay ka maarmi karaan ku tiirsanaanta xoolaha.

# FSAN oo tababartay wacyigeliyayaal cusub

24-kii Febraury iyo 3-dii Maarso, FSAN waxay tababar u sameysay 12 wacyigeliyayaal isugu jira rag iyo dumar, kuwaasoo ka kala soo jeeda wadamada Eritrea, Egypte iyo Sierra Leone.

Xubnahan cusub ee wacyigeliyayaasha ayaa loo tababaray sidii bulshooyinka ay ka soo jeedaan uga wacyigeliyaan halista gudniinka gabdhaha.

Tababarkan waxaa si wada jir ah casharo uga bixiyey Zahra Naleie, Miriam Glerum-Corciulo oo ka socday FSAN iyo Marthine Bos oo ka socotay hay'ada GGD.

Tababarkan maalmahii uu socday waxaa looga hadlay dhibaatooyinka caafimaad ee gudniinkan uu u leeyahay noloshu gabdhaha iyo sidoo kale waxaa ka soo qeybgalayaasha tababarkan la siiyey macluumaad la



**Wacyigeliyayaasha cusub oo la gudoonsiiyey shahaadooyin ka qeybgal ah**

xiriira sharciyada ka dhanka gudniinka gabdhaha iyo qaababka ay u mari karaan sidii bulshadooda ay uga digi lahaayeen halistiisa.

Gebagabadii tababarkan ayaa waxaa wacyigeliyayaasha cusub la gudnoonsiiyey shahaadooyin ka qeybgal ah oo muujinaya waxyaabihii ay ka korarsadeen intii uu socday tababarka.



FADUMO MUSE  
GGD UTRECHT



"Haddii ay jiraan haween dhibaato caafimaad ku qaba gudniinkii lagu sameeyey, waxay la soo xiriiri karaa email-ka [nazorgvgv@ggdrU.nl](mailto:nazorgvgv@ggdrU.nl) ama teleefoonada 0622567466 ama 06 20592218."

## Shir ku saabsanaa Tacadiyada haweenka

Zahra Naleie oo ka socotay FSAN ayaa 8dii bishii Maarso waxay ka magaalada Soest ee gobolka Utrecht kaga qeybgashay munaasibad uu soo qaban qaabiyey Stichting Balans, taasoo lagu maamusaayey maalinta caalamiga ee xaquuqda haweenka aduunka iyo tacadiyada ka dhanka dumarka.

Zahra ayaa munaasibadaasi kaga hadashay taariikhda halgankii dheeraa ee loo soo maray xaquuqda haweenka aduunka iyo kaalinta ay dumarka ku leeyihiin horumarka bulsho kasta.

Waxay sidoo kale ka hadashay arrimaha guud ahaan tacadiyada haweenka iyo gabdhaha soo foodsaara, gaar ahaan ka hortaga gudniinka gabdhaha iyo sharciyada ka dhanka arrintaasi.

Fadumo Muse, oo ka tirsan GGD Utrecht iyo nawaaxigeeda, oo iyaduna lagu casuumay madashaasi ayaa ka hadashay barnaamijka cusub (Nazorg) oo ay ka bilaabeen magaalooyinka Utrecht, Nieuwegein, Amsterfoort iyo Zeist, kaasoo loogu talagalay in daryeel caafimaad loogu fidiyo haweenka gudan, gaar ahaan kuwa ay la soo dersaan dhibaatooyinjo caafimaadka.

Stichting **Balans** waa urur ka shaqeeya arrimaha daryeelka buslahada oo ka dhisan magaalooyinka Soest en Soesterberg. Waxa uu barnaamijyo wacyigelin ah u sameeyaa dhalinyarada iyo dadka waaweyn.

# AROS

AUTORIJ SCHOOL



☎ 06 84 49 70 54

AFKAAGA  
HOOYO KU  
CIILBAX

AROS 



## DUGSIGA WADISTA BAABUURTA



BARASHADA  
THEORIE-GA SI FUDUD



BARASHADA  
WADISTA BAABUURKA



WAXAA LAGUGU  
BARAYAA QIIMO JABAN



WAXAA KU BARAYA  
MACALIN SOOMAALI AH



SABTI KASTA 11:30 ILAA 16:30

MACALIN ABDIRIZAK



VINCENT VAN GOGH LAAN 1 5246 GA HINTHAM 'S-HERTOGENBOSCH